Casharka 22

1. Miyaa Ilaah garanayey sharnimadii dadkii reer Sodom iyo Gomorrah?
-Haa.

2. Haddii dadku ay Ilaah illoobeen, miyuu Ilaah illoobay iyaga?
-Maya.

3. Haddii dadku Ilaah illoobeen, miyuu illoobayaa dembiyadooda?
-Maya.

4. Waa maxay sababta Ilaah u ciqaabo dembi waliba?
-Waayo Ilaah waa kaamil.
-Waayo Ilaah dadka wuxuu ku abuuray kaamilnimo
-Waayo dembi waliba Ilaah baa looga soo hor-jeedaa.

5. Waa maxay asbaabta Ilaah isla markiiba u ciqaabi waayey dadkii reer Sodom iyo Gomorrah?
-Waayo Ilaah wuxuu doonayey inay ka toobad-keenaan dembiyadooda.
-Waayo Ilaah wuxuu kaloo doonayey inuu badbaadiyo.

6. Waa maxay asbaaba Ilaah aanu isla markiiba dembiyada dadka maanta aanu wax uga qabanaynin?
-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inay dembiyadooda ka toobd-keenaan.
-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inuu iyaga badbaadiyo.

7. Miyaa Ilaah dadka u hanjabaa oo kaleya, balse aanu u ciqaabin dembiyadooda?



-Maya.
-Ilaah wuxuu wax ku dhufan doonaa dembi oo dhan.

8. Markii la soo gaaro wakhtigii Ilaah wax ku dhufan lahaa dembiyada, miyaa cidi istaajin kartaa Ilaah?
-

9. Markii aynu eegno sida dembigu Luut ugu soo jiiday Sodom, maxaan ka oran karnaa cawaaqibka dembigu u leeyahay dadka oodhan?
-Dembigu wuxuu dadka ku soo dhoweeyaa sharnimadiisa.

10. Sidee baannu maanta ula mid noqonaynaa masaal ahaan dadkii Sodom iyo Gomorrah?
-Waan been badan nahay.
-Dadka kalena been ayeynu ku eedaynaa.
-Waxanan si been ah u eedaynaa dadka kale.
-Waxaannu habaarnaa derisyadayada.
-Waxaannu soo bililiqaysannaa hantida dadka kale.
-Waxaannu la seexannaa dumarka ay qabaan ragga kale.
-Waxaan kaloo nahay gacan-ku-dhiigleyaal.

11. Maxaa ilaah u badbaadiyey Luut?
-Waayo Luut wuxuu garanayey inuu ilaah ku dembaabay.
-Waayo Luut wuxuu garanayey in dembigiisu keenayo dhimasho daa'im ah.
-Waayo wuuu Luut garanayey in Ilaah oo keliya awood u leeyahay inuu Badbaadiyo
-Waayo Luut wuxuu garanayey oo kale in Ilaah Badbaadiyaha u soo dir doono, si isaga uu ku Badbaadiyo.

12. Waa maxay sababtii Ilaah tiir cuso ah uga dhigay xaaskii

Luut?
-Xaaskii Luut Ilaah bay adeeci weysay, oo gadaal bay magaaladii Sodom iyo gomorrah u eegtay.

13. Maxaa xaaskii Luut ay gadaal ugu eegtay magaalda?
-Waayo waxay aad u jeclayd dembigeedii.
-Waayo ma aysan doonayn inay dembiyadeeda ka soo tagto.

-Ilaah wuxuu ballan-qaaday inuu Aabraam iyo Saarah uu siiyo wiil.

-Ibraahim wuxuu jiray 100 sannadood, oo Saarahna waxay jirtay 90 sannadood, oo welina carruur uma ayan dhalan.

-Miyaa Ilaah illaaway Ballankiisii ahaa inuu Ibraahim siinayo Wiil?
-Maya.

-Ilaah ma illoobo Ballamadiisa.
-Ilaah wuxuu mar waliba dhowraa Ballamadiisa.

-Miyaa Ilaah beddelay maankiisa, kaasoo ahaa inuu Ibraahim wiil siiyo?
-Maya.

-Ilaah Maaniisa ma beddelin.
-Ilaah wuxuu mar waliba sameeyaa wixii uu ballan qaado inuu sameyo.

-Ibraahim wuxuu jiray boqol sannadood, oo Saarahna waxay jirtay 90 sannadood, oo waxay ahayd ma dhalays.



-Miyey ku adkayd Ilaah in Ibraahim iyo Saarah uu siiyo wiil?
-Maya.

-Wax Ilaah ku adag ma lahan.
-Ilaah wuxuu samayn karaa wax waliba.

-Isla sidii Ilaah Ballan qaaday, wuxuu Ibraahim iyo Saarah siiyey wiil.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 21:1-3

1-Oo Rabbigu Saarah wuu soo booqday siduu yidhi, oo Rabbigu wuxuu Saarah u yeelay siduu kula hadlay.
2-Oo Saarah way uuraysatay, oo Ibraahim wiil bay u dhashay isagoo da’ weyn, waxayna ahayd wakhtigii Ilaah kala hadlay isaga.
3-Oo Ibraahim wuxuu wiilkiisii u dhashay, oo Saarah u dhashay isaga, u bixiyey Isxaaq.

-Sidee baa Ibraahi, oo boql jir ahaa, iyo Saarah oo 90 jir ahayd oo weliba ma dhalays ahayd, ay u awoodeen inay wiil dhalaan?

-Waayo Waa Ilaah kan nolosha bixiya.
-Waayo waa Ilaah kan wax waliba sameeya.

-Muxuu ahaa magaca wiilka Ilaah siiyey Ibraahim Iyo saarah?
-Isxaaq.

-Ka dib sannado badan, Isxaaq wuxuu noqday wiil xoog badan.
-Ibraahim iyo Saarahna aad bay u jeclaayeen.

-Miyuu Ibraahim ogaa in Ilaah horey u qorshaystay inuu Isxaaq ka

imanayo Badbaadiyaha?
-Haa.

-Ibraahim wuxuu xusuustay ballankii Ibraahim ee ahaa inuu Badbaadiyaha ka soo daahirin doono faracii Isxaaq.

-Maalin, ayaa Ilaah kala hadlay Ibraahim wax Isxaaq ku saabsan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 22:1-2

1- Oo waxaa dhacay waxyaalahaas ka dib, in Ilaah tijaabiyey ibraahim, oo uu ku yidhi, Ibraahimow, Isna wuxuu yidhi, Waa i kan.
2- Markaasuu ku yidhi, Hadda kaxee wiilkaaga kelidiis ah, kan aad jeceshahay, oo ah Isxaaq, oo u kac dalka Moriyaah; oo halkaas isaga sida allabbari la gubo ku dul bixi buuraha middood oo aan kuu sheegi doono.

-Mxaa Ilaah amarka ugu bixiyey in Ibraahim qurbaan ahaan u bixiyo Isxaaq?

-Ilaah wuxuu doonayey inuu Ibraahim tijaabiyo.

-Maxaa Ilaah u doonayaa in uu Ibraahim tijaabiyo?

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu arko in Ibraahim jecel yahay wax badan Ilaah, iyo inuu jecel yahay Isxaaq.

-Sidee buu Ilaah ku awooday inuu bixiyo amarka ah in Ibraahim qurbaan ahaan u bixiyo Isxaaq.

-Waayo Ilaah waa kan nolosha siiyey Ibaahim.



-Waayo Ilaah waa kan nolosha siiyey Isxaq.
-Waayo Ilaah waa Sayidka dadka oodhan.

-Miyaa deriskaaga ay u sheegi karaan carruurtada waxa la yeelayo?
-Maya.

-Maxaa sabab u ah?
-Waayo derisyadaadu maahan sayidka carruurtaada.

-Miyaa deriskaagu go'aamiya sida aad beertaada u beeranayso?
-Maya.

-Maxaa ugu wacan?
-Waayo deriskaaga maahan Sayidka beertaada.

-Haddaba waa kuma Rabbiga Isxaaq?
-Waa Ilaah.
-Waa kuma Rabbiga dadka oo dhan ika leh?
-Waa Ilaah.

-Waayo Ilaah waa Sayidka dadka ood han, Sababtaas aawadeed Ilaah wuxuu awood u leeyahay inuu sameeyo wixii uu doonayo.

-Markii Ilaah ku amray Ibraahim inuu wiilkiisa qurbaan ahaan u bixiyo, Muxuu Ibraahim sameeyey?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 22:3

3- Oo aroortii horaa Ibraahim kacay, oo wuxuu kooraystay dameerkiisii, oo wuxuu kaxaystay laba ka mid ah dhallinyaradiisii, iyo wiilkiisii Isxaaq; qoryihiina allabbariga la gubo wuu u

jeexjeexay, wuuna kacay, oo wuxuu tegey meeshii Ilaah u sheegay.

-Ibraahim wuxuu soo qaatay quryihii qurbaanka lagu gubi lahaa, wuxuuna soo watay isxaaq iyo laba ka mid ah addoommadiisa oo uu u soo kaxaystay halkii Ilaah tusi doonay.

-Sidee baa Ibraahim wiilkiisa Isxaaq qurbaan ahaan ugu bixinayaa?

-Haddii Ibraahim Isxaaq qurbaan ahaan u bixiyey, sidee baa Ilaah ku adkaynayaa ballankiisa?

-Haddii Ibraahim qurbaan ahaan u bixiyo Isxaaq, sidee baa Ilaah u siinayaa Ibraahim farac?

-Haddii Ibraahim bixiyo Isxaaq, sidee baa Ilaah Badbaadiyaha uga soo saarayaa faracii Ibraahim?

-Ilaah wuxuu ka ballan qaaday Ibraahim in Isxaaq uu noqon doono Aabbaha farac badan, oo Badbaadiyuhuna wuxuu ka soo bixi doonaa farcankiisa.

-Miyaa Ilaah beddelay maankiisa?
-Maya.
-Miyaa Ilaah goostay nuu inuu burburiyo ballamadiisa?
-Maya.
-Miyaa Ibraahim ay la tahay in Ilaah beddeli doono maankiisa?
-Maya.

-Ibraahim Ilaah iyo ballamadii uu siiyey isagaba wuu rumaystay.
-Ibraahim wuxuu kaloo rumaysnaa in Ilaah dhowrayo



Ballamadiisa.

-Ibraahim wuxuu rumaysnaa in Ilaah dhowrayo ballakiinii ahaa inuu isaga siin doono farcan.

-Ibraahim wuxuu rumaystay in Ilaah ballammadiisa uu dhowri doono si uu Badbaadiyaha u soo diro.

-Muxuu Ibraahim u rumeeyey in Ilaah ballankiisa uu dhowri doono haddii uu wiilkiisa qurbaan ahaan u bixiyo?

-Ibraahim wuxuu rumaystay haddii uu Isxaaq qurbaan ahaan u bixiyo, in Ilaah Isxaaq ka kicin doono dhimashada.

-Ibraahim wuu ka duwanaa Aadan iyo Xaawo.

-Markii Beer Ceeden la joogay, Ilaah wuxuu u sheegay Aadan iyo Xaawo inay dhiman doonaan haddii ay cunaan geedka Aqoonta Wanaagga iyo Xumaanta.

-Aadan iyo Xawo Ilaah ma aysan rumayan.
-Laakiin Ibraahim Ilaah buu rumaystay.

-Rumaysadkii uu Ilaah rumaysnaa awgii, ayaa Ilaah wuxuu soo watay Isxaaq iyo laba ka mid ah addoommadiisa oo wuxuu u soo watay halkii Ilaah ku soo hoggaamiyey.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 22:4-6a

1-Maalintii saddexaad ayuu Ibraahim indhihiisia kor u taagay, markaasuu meeshii oo ka fog arkay.
5-Ibraahimna wuxuu raggiisii dhallinyarada ahaa ku yidhi,

Idinku halkan dameerka la jooga, aniga iyo wiilkuna halkoo baannu tegaynaa oo Ilaah ku soo caabudaynaa, dabadeedna waannu idinku soo noqonaynaa.

6-Ibraahimna wuxuu qaaday qoryihii allabbariga la gubo, oo wuxuu saray wiilkiisii Isaaq, isna wuxuu gacantiisa ku qaaday dabkii iyo mindidii.

-Intii Ibraahim iyo Isxaaq ay wada socdeen, Isxaaq wuxuu su'aal weyddiiyey aabbihiis.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 22:6b-7

6-Markaasay labadoodiiba israaceen.
7-Isxaaqna waa la hadlay aabbihiis Ibraahim oo yidhi, Aabbow, Isna wuxuu yidhi, Waa i kan, wiilkaygiiyow. Markaasuu ku yidhi, Bal eeg, waa kuwan dabkii iyo qoryihii, laakiinse meeh wankii allabbariga la gubo loo bixin lahaa?

-Maxay ahayd su'aashii Isxaaq?

-Wuxuu AAbbihii weyddiiyey aaway wankii Qrubaanka?

-Isxaaq wuxuu garanayey in Aabbihii qurbaan bixinayo.
-Isxaaq wuxuu kaloo garanayey inay wadaan dabkii iyo qoryihii.

-Welibana Isxaaq ma uusan garan waxa aanay u wadanin wan lagu allabbaryo.

-Maxay ahddaba ahayd jawaabtii Ibraam siiyey Isxaaq oo wiilkiisa ahaa?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 22:8



8-Ibraahimna wuxuu yidhi, Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabbariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow, saas daraaddeed labadoodiiba way israaceen.

-Maxay ahayd jaaabtii Ibraahim?

-Ibraahim wuxuu yiri, Ilaah baa keni doona wankii qurbaanka.

-Ibraahimna wuxuu rumaystay in Ilaah keeni doono qurbaanka.

-In Ilaah la rumaysto ayaa ah shaqada ugu ahmiyadda weyn leh ee aynu samayn karno.

-Markii aynu farriinta Ilaah dhegaysanno, ku badbaadi mayno.

-Wxannu ku badbaadaynaa inaan rumaysanno farriinta Ilaah.

-Bal aan tusaale idin siiyo:

-Waxaa jiray nin aad iyo aad u jirannaa oo u tegey nin dhakhtar ah.

-Ninkii dhakhtarka ahaa ayaa eegay qofkii jiranaa, oo wuxuu u sheegay cudurkii hayey.

-Dabadeeto, ditoorkii wuxuu siiyey ninkii jiranaa daawada uu u baahnaa si uu haddana u caafimaado.

-Ninkii jiranaa wuxuu soo qaatay daawadii oo wuxuu soo geliyey jeebkiisa, oo wuxuu ku soo laabtay gurigiisa.

-Laakiin, ninkii jiranaa ma laqin daawada.

-Ninkii jiranaa wuxuu maqlay oo keliya dhakhtarkii.
-Balse wuu diiday inuu daawada liqo.

-Miyaa qofkii jiranaa  caafimaadayaa?
-Maya.

-Markaa inaad maqasho oo keliya kugu badaadin mayso farriinta Ilaah.

-Waase inaad rumaysataa farriinta Ilaah isla sidii Ibraahim oo kale.

-Haddii aad maqasho farriinta Ilaah, laakiin aadan Ilaah rumaysan, waxaa la mid tahay sida Shayddaanka.

-Haddii aad maqasho farriinta Ilaah, laakiin aadan rumaysan, waxaad Ilaah ugu yeeraysaa beenaale.

-Ilaah wuxuu badbaadiyaa kuwa isaga rumaysta.
-Ilaah wuxuu badbaadiyaa oo keliya kuwa rumaysta Hadalladiisa.

-Halke baa laga helaa Hadallada Ilaah?
-Waxa laga dhex helaa Kitaabka Baybalka.

-Goorma ayaa ibraahim iyo Isxaaq ay gaareen meeshii Ilaah tusayey, maxaase dhacay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 22:9-10.

9-Oo waxay yimaadeen meeshii Ilaah isaga u sheegay; Ibraahimna meeshaasuu ka dhisay meeshii allbbariga, qoryihiina wuu hagaajiyey, markaasuu xidhay wiilkiisii Isxaaq, oo meeshii allabbariga saray qoryihii dushooda.



10-Ibraahimna gacantiisii buu fidiyey, oo mindidii buu u qaaday inuu wiilkiisii dilo.

-Maxaa Ibraahim sameeyey?

-Wuxuu xir-xiray Isxaaq, oo wuxuu dul saray qoryihii Allabbariga dushooda.

-Miyaa Ibraahim awooday inuu badbaadiyo Isxaaq?
-Maya.

-Waa maxay sababta Ibraahim ku awoodi waayey inuu bdbaadiyo Isxaaq?

-Waayo Ibraahim wuxuu kor u qaaday mididiisii, oo wuxuu doonayey inuu Isxaaq qurbaan ahaan u bixiyo.

-Miyaa Isxaaq awooday inuu badbaadiyo Isaga?
-Maya.

-Maxaa Isxaaq u awoodi waayey inuu is-badbaadiyo?

-Waayo Ibraahim wuxuu xiray gacmaha iyo lugaha Isxaaq.

-Meel uu ku baxsan karay Isxaaq ma lahayn.

-Isla sidii dadkii doonnidii Nuux oo kacaysa arkayba ay u dooneen inay doonnida qabsadaan, laakiin way kari waayeen inay soo galaan, waayo Ilaah baa dusha uga xiray iyaga.

-Welibana dadkii magaaladii Sodom iyo Gomorra ayaan baxsan karin, markii Ilaah magaalada hareereeyey.

-Ibraahim awood uma lahayn inuu Isxaaq badbaadiyo.
-Isxaaq awood uma lahayn inuu is-badbaadiyey.

-Waa kuma kan kelidiis awoodda u lahaa inuu Isxaaq badbaadiyo.
-Ilaah.

-Miya dad kale oo awood u leh inay ina badbaadiyaan la helayaa?
-Maya.

-Miyaannu haddaba awoodnaa inaynu is-badbaadinno/
-Maya.

-Waa kuma kan keliya ee awooda inuu ina badbaadiyo?
-Ilaah.

-Ilaah oo keliya ayaa badbaadiyey Nuux iyo qoyskiisii.
-Ilaah oo keliya ayaa badbaadiyey Luut yo gabdhihiisii.

-Ilaah oo keliya ayaa badbaadiya dadka oodhan.
-Ilaah oo keliya ayaa awood u leh inuu badbaadiyey Isxaaq.

-Miyaa Ilaah badbaadiyey Isxaaq?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 22:11-12

11-Markaasay malaa'igtii Rabbigu samada ugu yeedhay isaga, oo waxay ku tidhi, Ibraahimow Ibraahimow, Kolkaasuu yidhi, Waa i kan.

12-Markaasay ku tidhi, Gacantaada ha saarin wiilka, waxbana ha ku samaynin: waayo, hadda waan garanayaa inaad ilaah ka cabsatid, maxaa yeelay, igama aadan lexejeclaysan wiilkaaga. Kaas oo ahaa wiilkaaga keligiis ah.



-Yaa la hadlay Ibraahim oo welibana badbaadiyey Isxaaq?
-Ilaah.

-Ilaah oo keliya ayaa Ibraahim ka qabtay Isxaq.
-Ilaah oo keliya ayaa badbaadiyey Isxaaq.

-Laakiin Isxaq lama badbaadiyeen haddaanay jirin ama la kenin qurbaan kale.

-Miyaa Ibraahim watay qurbaan kale?
-Maya.
-Miyaa Isxaaq helay qurbaan kale?
-Maya.

-Maxaa Ilaah sameeyey?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 22:13

13-Markaasaa Ibraahim indhihiisii kor u taagay, oo wax fiiriyey, oo wuxuu dabadiisa ku arkay orgi geesaha kayn kula jira. Markaasaa Ibraahim tegey oo wankii soo kaxeeyey, oo wuxuu u bixiyey allabari guban meeshii wiilkiisa.

-Isxaaq ma uusan wadanin qurbaan kale.
-Ibraahim ma haysanin qurban kale.

-Yaa qurbaanka Isxaq beddelkiisa galay keenay?
-Ilaah.

-Ilaah oo keliya ayaa keenay allabbariga.

-Maxay ahayd qurbaankii Ilaah keenay?

-Orgi.

-Halkee buu orgigu joogay?

-Ogigu meel Ibraahim ka dambaysa ayuu taagnaa, isagoo geesaha kula jira kaynta.

-Maxaa Ilaah orgiga geesaha ug geliyey kaynta?
-Waayo Ilaah baa xiray orgiga.

-Maxaa sabab u ah ee Ilaah orgiga geesaha ugu geliyey kaynta ama uga xiray?

-Waayo Ilaah wuxuu aqbalayaa oo keliya qurbaanka ku habboon oo geli kara booskii Isxaaq.

-Haddii orgiga madaxa laga xiro ama lugaha laga xigo, wuu is-dhawixi lahaa, isagoo doonayo inuu baxsado.

-Ilaah waa Kaamil.
-Ilaah wuxuu aqbalayaa oo keliya qurbaan kaamil ah.

-Ibraahim wuxuu sii daayey wiilkiisii, oo wuxuu soo qabtay orgigii Ilaah siiyey Isaga, oo wuxuu saaray iskutallaabtii.

-Ibraahim wuxuu gowracay orgiga, oo wuxuu soo galay booskii Isxaaq.

-Orgiga ayaa u dhintay beddelkii Isxaaq.
-Orgiga wuxuu galay beddelkii Isxaaq.

-Muxuu Ibraahim halkan ugu yeeray, waa meeshii Ilaah ugu



keenay orgiga e?

Bal aynu akhrinno 22:14-19

14-Ibraahimna meeshas wuxuu u bixiyey *Yehowah Yireh; xataa ilaa maanta waxaa la yiraahdaa, Buurta Rabbiga ayaa lagu arki doonaa.
15-Kolkaasaa mar labaad malaa'gitii Rabbigi Ibraahim samada uga yeedhay,
16-Oo waxay ku tidhi, Rabbigu wuxuu yidhi, Waxa aad samaysa aawadood, iyo wiilkaaga aadan iga lexejeclaysan, kaas oo ah wiilkaaga keligiis ah aawadiis ayaan nafsaddayda ku dhaartay
17-inaan barako ku barakadayn doono, oo aan farcankaaga u tarmin doono sida xiddigaha cirka, io sida camuudda taal badda xeebteeda: oo uu farcankaaguna hantiyi doono cadaawayaashiisa iriddooda;
18-Oo ay quruumaha dunida ood hammu ku barakoodi doonaan farcankaaga, maxaa yeelay, codkaygaad addeecday.
19-Hadaba Ibraahim wuxuu ku noqday raggiisii dhallinyarada ahaa, markaasay kaceen oo waxay wada tageen Bi'ir Shebac, Ibraahimna wuxuu iska degay Bi’ir Shebac.

-Ibraahim wuxuu meeshii Ilaah ugu keenay orgiga ugu yeeray, Yehowah Yireh; ama Buurta Ilaah baa lagu arki doonaa.

-Maaa ilaah ugu yeeray meeshii qurbanka uu ku bixiyey, Buurta Ilaah baa lagu arki doonaa?

-Ibaahim wuxuu rumaystay isla sida Ilaah orgiga u keenay, inuu maallin maalmaha ka mid ah Badbaadiyaha u keeni doono si uu dadka u badbaadiyo.